ICRC

SOOMAALIYA

# XAQIIQOOYINKA IYO TIROOYINKA

JANAAYO - DISEEMBAR 2022



**Guddiga Caalamiga ah ee Laanqeyrta Cas (ICRC) ee Soomaaliya ayaa isaga oo kaashanaya Ururka Bisha Cas ee Soomaaliyeed (SRCS) waxa uu muddo 40 sano ah ka jawaabayay baahida dadka ay saameeyeen colaadda, rabshadaha iyo dhibaatooyinka cimillada.**

sanadkii 2022, malaayiin qof oo Soomaaliya ku nool ayaa wajahay saameynta aadka u daran ee abaarta. Biyo yarida ayaa dadka siyaabo badan u saameysay, iyada oo keentay cunto yari, nafaqo-xumi iyo cudurro dillaacay. Kororka rabshadaha iyo colaadda ayaa uga sii daray xaaladda, gaar ahaan meelaha ay adagtahay in la gaaro halkaas oo helitaanka adeegyada aasaasiga ah uu markii horeba adkaa. ICRC-da ayaa kordhisay dadaalkeeda si kaalmo naf badbaadin ah loo gaarsiiyo bulshooyinka ay dhibaatadu soo gaartay, oo ay ku jiraan kuwa ku nool meelaha aanan la gaari karin, oo ay colaaduhu saameeyeen.

## BIXINTA KAALMADA DARYEELKA DEG-DEGGA AH, SOO CELINTA HAB-NOLOLEEDKA IYO DHISIDDA AWOODAHA IYO ADKEYSIGA

- **1,054,356** qof ayaa helay deeqo lacageed oo ujeedadoodu badantahay iyada oo loo maray ka jawaabidda abaarta. Intaa waxaa dheer, **51,504** oo dadkaas ka mid ah ayaa lagu caawiyay qeyb ahaan alaabta EHI.
- **49,869** oo ah caruur ka yar 5 sano iyo **17,041** oo ah dumar uur leh ama nuujinaya ayaa helay caawimaad ka kooban PlumpySup iyo Cereals.
- **51,900** qof oo ka mid ah bulshada ku nool wabiga jiinkiisa ayaa lagu caawiyay deeqaha soo kabashada beeraha ka dib markii ay heleen deeqo lacageed oo ujeedooyin badan leh. **1,644** qof oo ka mid ah dadkaas ayaa helay kaalmo lacageed iyo abuurka galleyda.
- **1,290** qof ayaa la siiyay kaalmo lacageed iyaga oo sidoo kalena helay lacago ay ku soo iibsadaan qalabka shaqada.
- **122,658** qof ayaa helay jawaanada carrada oo ay bixisay SRCS si looga hortago fatahaadaha.
- **3,276** oo ah xubnaha iskaashatada beeraleyda ayaa helay walxo ku saabsan beeraha iyo tababarro ku aadan wax soo saarka abuurka mar walba la beerto.
- **24** ka mid ah Shaqaalaha Caafimaadka Xoolaha Bulshada ayaa ka faa'iideystay tababar is-xasuusin ah oo ku saabsan ololaha daweynta xoolaha oo ka dhacay Puntland.
- **123** oo ah mutadawiciin ka tirsan SRCS oo qeyb ka ah Barnaamijka bartilmaameedke Quudinta Dheeriga ah (TSFP), iyada oo taageero laga helayo ICRC, ayaa lagu tababaray Barnaamijka Maareynta Isku-dhafan ee Nafaqo-xumada daran (IMAM).
- **395** oo ah dumar hogaamiya qoysas ayaa lagu caawiyay deeqo loogu talogalay ganacsiyada yar yar.
- **870** qof ayaa helay qlabka shinnida lagu dhaqdo iyo tababar.
- **900** qof ayaa helay qlabka lagu kalluumeysto iyo tababar.
- **2,815** maxaabiis ah ayaa helay cunto loogu talogalay **5** xabsi.
- **1,936** maxaabiis ah oo ku jira xabsiyada Mandheera, Garoowe, Boosaaso iyo Hargeysa ayaa helay maro kaneeco, joodariyaal iyo bustayaal.

## CAAFIMAADKA – FUDUDEYNTA HELITAANKA DARYEEL CAAFIMAAD IYADA OO LA KAASHANAYO SRCS

- **553,596** bukaan ayaa helay adeegyada Daryeelka Caafimaadka Aasaasiga ah (PHC) iyaga oo ka helay **36** xarun caafimaad.
- **28,110** bukaan ayaa lagu daryeelay Barnaamijka Nafaqo-kudaweynta Bukaan socodka (OTP).
- **6,428** baaritaano ah ayaa laga sameeyay Isbitaalka Guud ee Kismaayo, **2,095** Isbitaalka Keysaneey, **7,733** isbitaalka Madina iyo **10,931** Isbitaalka Baydhaba.
- **5,490** bukaan ayaa lagu daweeyay Xarumaha Dajinta xaaldda bukaanada ee Kismaayo iyo Baydhaba.
- **2,346** ka faa'iideystayaal daryeelka caafimaadka aasaasiga ah ayaa gargaarka deg-degga ah ama daryeel gaar ah loogu diray isbitaalo kala duwan oo ku yaala gobolka iyada oo lacagta gaadiidkana laga bixiyay.

## KA JAWAABIDDA SHUBAN BIYOODKA DARAN EE DILLAACAY

- **212,432** qof ayaa ka qeybgalay **31,911** kulamo kor loogu qaadayay caafimaadka oo la qabtay si looga hortago shuban biyoodka daran.
- **3,025** xaalado shuban biyoodka daran ah ayaa la aqoonsaday iyada oo loo diray si loogu daweeyo xarumo caafimaad oo kala duwan oo uu leeyahay Ururka Bisha Cas ee Soomaaliyeed oo ku yaala meelaha ay dhibaatadu gaartay.






## BARNAAMIJKA DHAQAN CELINTA JIRKA

- **7,037** qof ayaa ka faa'iideystay adeegyada dhaqan celinta jirka. (**2,850** Muqdisho, **1,473** Hargeysa, **2,714** Gaalkacyo sida ay u kala horeeyaan)
- Moqadisho; **247** qeybaha jirka oo macmal ah, **731** qalabka xubnaha jirka kaalmeeya ah, **558** qalabka socodka kaalmeeya iyo biraha naafada, **60** kuraasta naafada iyo aaladaha lagu toosiyo qaab-dhismeedka jirka ayaa la bixiyay. **6,350** oo ah kulamada fiiso-tarbiyada ayaa la qabtay.
- In Hargeysa; **160** qeybaha jirka oo macmal ah, **207** qalabka xubnaha jirka kaalmeeya ah, **85** qalabka socodka kaalmeeya iyo biraha naafada, **46** kuraasta naafada iyo aaladaha lagu toosiyo qaab-dhismeedka jirka ayaa la bixiyay. **6,151** oo ah kulamada fiiso-tarbiyada ayaa la qabtay.
- In Galkacyo; **95** qeybaha jirka oo macmal ah, **519** qalabka xubnaha jirka kaalmeeya ah,**457** qalabka socodka kaalmeeya iyo biraha naafada, **135** kuraasta naafada iyo aaladaha lagu toosiyo qaab-dhismeedka jirka ayaa la bixiyay. **7,020** oo ah kulamada fiiso-tarbiyada ayaa la qabtay.

## BARNAAMIJKA GARGAARKA DEG-DEGGA AH

- In ka badan **298** bukaano dhaawac hub ah uu soo gaaray ayaa la daweeyay arintan oo ka mid ah adeegyada Gargaarka deg-degga ah iyo Daryeelka Deg-degga ah ee Isbitaalka ka hor.
- **400** oo ka qeybgaleyaala ah ayaa xaadiray koorsada Tababarka Gargaarka deg-degga ah ee Bulshada (CFAT) oo lagu qabtay gobollada Laascaanood, Kismaayo, Baydhabo, Walaweyn, Dhuusamareeb iyo Garoowe.
- Isugeyn **1,606** ka qeygaleyaal ah oo ay ku jiraan kooxaha mutadawiciinta ka jawaabta wicitaanada bulshada ayaa ka qeybgalay koorsooyinka Gargaarka Deg-degga ah iyo daryeelka deg-degga ah ee Isbitaalka ka hor (PHEC) sida tababarka Gargaarka deg-degga ah ee joogtada ah iyo Tababarka Gargaarka deg-degga ah ee Bulshada(CFAT).

## FUDUDEYNTA HELITAANKA BIYO NADIIF AH, NADAAFADDA IYO ADEEGYADA KAABAYAASHA CAAFIMAADKA/XABSIYADA

- **282,171** qof ayaa biyo nadiif ah ka helay **65** nidaamyada biyaha ah.
- **6,510** qof oo ku dhaqan Guriceel ayaa helay biyo nadiif ah oo la cabi karo. Ololaha kor u qaadista nadaafadda ayaa laga dhaqangaliyay **7** tuulo oo ku yaala Baardheere, Beled Xaawo, Dhoobleey, Kismaayo, Baydhabo, Marka iyo Jowhar.
- Isbitaalka Kismaayo (**450** sariirood) iyo isbitaalka Keysaneey (**110** sariirood), dhismaha qolka mashiinka raajada oo la dhammeystiray.
- isbitaalka Madiina (**250** sariirood), shaqada dib-u-habeynta qeybta dharka lagu dhaqo iyo waddooyinka isku xira qeybaha kala duwan ee isbitaalka oo la dhammeystiray.
- **3** teendho ayaa loogu deeqay isbitaalka Beledweyne (**102** sariirood) arintan oo ka danbeysay qaraxii qeyb ahaan baabi'yay isbitaalka, si loogu adeegsado meelo lagu qaabilo laguna baaro bukaanada.
- Tababar loo qabtay kooxaha isbitaallada Kismaayo iyo Keysaneey si ay dayactir ugu sameeyaan qalabka muhiimka ah una hagaajiyaan nidaamka korontada ayaa la qabtay.
- xaaladda nololeed ee bukaanada ayaa la hagaajiyay **3** xabsi. Hargeysa iyo Garoowe hagaajin ay ku jirto shaqo laga qabtay nidaamka biyaha, hawada hagaajin lagu sameeyay qaab-dhismeedka, halkaa oo **1** jiko cusub iyo foornada rootiga oo u adeegeysa **638** maxaabiis ah oo ku jira Mandheera la dhammeystiray.
- **3,858** maxaabiis ah ayaa ka faa'iideystay **2** qeybin agabka nadaafadda ah oo la sameeyay sanadka oo dhan. Qeybinta ayaa laga sameeyay **11** xabsi.
- **3** xarumaha daryeelka caafimaadka aasaasiga ah oo ku yaala Kismaayo, Balcad iyo Guriceel entirely ayaa gabi ahaanba dib loo dhisay.
- **20** howlwadeenada ceelasha ah oo ka tirsan Wakaaladda Horumarinta Biyaha ee Puntland (PWDA) ayaa la tababaray iyada oo la siiyay qalab ay howl-maalmeedkooda iyo dayactirka ceelasha ku qabsadaan.



## ILAALINTA DADKA RAYIDKA AH

- **40** qof ayaa helay kaalmo lacageed si looga caawiyo ka soo kabashada colaadaha iyo rabshadaha.
- taageero dhinacya badan ah oo ay ku jiraan qiimeyn caafimaad, tababarka gargaarka deg-degga ah, taageerada hab-nololeedka iyo mashruucyada MEI oo laga fuliyay  Xudur si hoos loogu dhigo la kulanka khatarah dhinaca ammaanka ah ee bulshada ay dhibtu gaartay.
- **5** kulamad lagu gudbinayi barnaamijka Daryeelka Caafiimaadka oo Halis ku jira oo loo qabtay howlwadeeno ka kala socday **3** isbitaal iyo xarun ka shaqeysa daryeelka caafimaadka aasaasiga ah.

## CAAWINTA IN LA HAGAAJIYO XAALADAHA NOLOLEED IYO HABKA LOO LA DHAQMAYO MAXAABIISTA

- ICRC-da ayaa booqatay **10** xabsi oo ay ku jiraan **3,770** maxaabiis ah si loo qiimeeyo xaaladooda nololeed iyo sida loo la dhaqamo. **109** maxaabiis ayaa la kormeeray lana booqday si gaar agar.
- **10**-ka xabsi ee la booqday, **159** farriimaha akhbaarta qoyska ah ayaa loo gudbiyay qoysaska maxaabiista iyada oo la adeegsanayo taleefan iyo **9** Qof oo ajnabi ah oo lagu wargaliyay qunsulkooda ama UNHCR.
- Deeqo ka kooban agabka ciyaaraha iyo nasashada oo loo sameeyay **2** xabsi.
- deeqo isugu jira dawooyin iyo qalab caafimaad ayaa loo sameeyay **4** xabsi iyada oo ay ka faa'iideysteen in ka badan **1,824** oo maxaabiis ah.
- Sameynta guddiga nadaafadda xabsiga iyo tababarka hagaajinta xaaladaha nadaafadeed oo loo sameeyay **1,699** oo maxbuus ayaa lagu qabtay **3** xabsi.
- Olole cayayaan dilid ah si loo hagaajiyo xaaladaha nololeed ee **1,182** oo maxbuus ayaa lagu qabtay **2** xabsi.
- **3** maxbuus ayaa helay daweyn loogu sameeyay xarumo caafimaad oo taqasus gaar ah le si gaar ahna loo leeyahay.
- Daweyn taageero ah oo loo sameeyay maxaabiis qaba nafaqo-xumo daran iyo mid dhexdhexaad ah ayaa laga bixiyay **2** xabsi.

## ILAALINTA XIRIIRKA QOYSKA

- Iyada la kaashanayo SRCS, **129,258** oo ah Farriimaha Laanqeyrta Cas ayaa la isdhaafsaday, **171,738** oo ah wicitaano taleefan oo bilaash ah ayaa loo sameeyay qoysaska kala lumay iyo **303** oo dad la la'aa oo la soo helay.
- **11** oo wicitaano muuqaal ah ayaa loo fududeeyay qoysaska ku nool Soomaaliya iyo **2** maxbuus oo dibadda joga.

## WAAXDA MAAREYNTA KHATARTA- HUBINTA U-XISAAB CELINTA DADKA AY DHIBAATADU GAARTAY

**Xarunta Xiriirka bulshada (373):**

- Isugeyn **15,404** oo ah wicitaano ka yimid dadka ay dhibaatadu gaartay ayaa la helay oo la meel mariyay iyada oo la adeegsanayo khadka bilaashka ah ee (**373**) wicitaanada oo ka imanayay meelo kala duwan.
- **87%** (**13,384**) oo wicitaanada ah ayaa la xiriiray ka jawaabidda abaarta ee ICRC ee hadda socota. Dadka ayaa inta badan wicitaanada ka soo sameynayay gobollada Hiraan (**1,296**), Jubada Hoose (**1,201**), Bakool (**980**) iyo Baay (**925**).
- **13%** (**2,020**) oo ka mid ah wicitaanada ayaa la xiriiray Barnaamijka Daryeelka Caafimaadka Aasaasiga ah iyaga oo inta badan ka imanayay Shabeellada Dhexe (**282**) iyo Hiraan (**206**).



## ISGAARSIINTA – FAAFINTA AQOONTA IYO KOR U QAADISTA MABAADII'DA BINI'AADAMNIMADA IYO IHL

- In ka badan **31,405** oo ah hogaamiyeyaasha bulshada, dumarka, dhalinyarada, ka faa'iideystayaasha iyo mutadawiciin ka tirsan SRCS ayaa lagu wacyigaliyay Maadii'da Aasaasiga ah iyada oo sidoo kale la ogeysiiyay howlaha iyo barnaamijyada ICRC iyo SRCS.
- **1,017** oo ah xubnaha hubeysan, ciidamada ammaanka iyo booliska ayaa la baray xeerka caalamiga ah ee bini'aadamnimada.



**ICRC Somalia Delegation**
Ngecha Road off Lower Kabete Road
P.O.Box 73226-00200 Nairobi-Kenya T + 254 0709 132 000
SOK-Nairobi@icrc.org

ICRC offices in Mogadishu, Kismayo, Garowe, Baidoa, Jowhar, Guricel and Hargeisa.
www.icrc.org
All photos: ICRC
© ICRC, January 2023

ICRC

facebook.com/ICRCAfrica
twitter.com/ICRC_Africa
https://www.instagram.com/icrc_somalia/
blogs.icrc.org/Somalia

2022.1928/402